

Covid-19, macluumaadka bukaanka

Dhakhaatiirta ka hortaga cudurrada faafa warqaddooda iska ilaalinta cudurrada faafa

Waa maxay sababta macluumaadkan la ii siiyay?

Baaritaanno ayaa waxay muujiyeen in aad qabtid covid-19, infekshin uu keeno fayruska corona SARS-CoV-2.

Waa maxay covid-19?

Covid-19 waa caabuq faayras kaas oo badanaaba sababa calaamado khafiif ah sida diif, dhuun xanuun, qufac iyo xummad, laakiin dadka qaarkood si khatar ah ayay u xanuusadaan oo yeeshaan dhibaatooyin neefsashada ah una baahdaan in lagu daryeelo isbitaal.

Calaamadaha kale ee covid-19 waxay ahaan karaan muruq xanuun, madax xanuun, daal, dareenka urta iyo dhadhanka oo xumaada iyo dhibaatooyin caloosha oo wata shuban.

Sidee baa laysu qaadsiiyaa covid-19?

Covid-19 waxaa lagu kala qaadaa ugu horeyn xiriirka dhow ee u dhaxeeya dadka ee dhibcaha neef mareenka ay isku dhaafsadaan. Marka qof caabuq qabaa hindhiso, qufaco, hadlo ama neefsado ayey dhibcahan yar ku faafaan meesha ku hareersan. Wuxuu cudurka jirka ka geli karaa neef jiidashada ama in qofku gacmahiisa oo aan nadiif ahayn ku taabto indhaha ama xuub-axaleedyada gudaha sanko iyo afka.

Qofka caabuqa qaba wuu qaadsiin karaa dad kale isla ka hor intaan calaamadaha cudurku ku billaabmin. Wakhtiga laga soo billaabo marka qofku qaado cudurkan ilaa inta qofku u xanuusanayo (wakhtiga soo ridashada) wuu kala duwanyahay wuxuuna u dhaxeeyaa 2 iyo 14 maalmood, caadiyan waa 3 ilaa 4 maalmood.

Ilaa wakhti intee la eg ayaan dad qaadsiin karaa?

Waqtiga qofku dadka qaadsiin karo way ku kala duwanaa karaan dadku. Kuwa aadka u buka waxay badanaa dadka qaadsiin karaan cudurka wakhti yara ka dheer marka la barbardhigo kuwa qaba jiro khafiif ah.

- Waxaa lagu arkaa inaad ugu yaraan 5 maalmood dadka cudurka qaadsiin kartid laga billaabo markaad cudurka qaaday. Haddii aadan guud ahaan soo fiicnaan oo aanad feebaro la'aan noqon 2 maalmood ee ugu dambeeyey, waxaa laga yaabaa in aad 5 maalin ka badan cudur dadka qaadsiin kartid. Haddii ay kugu sii harsanyihiin calaamado cudur oo khafiif ah oo keliya sida riiraxyo iyo dareenka dhadhanka iyo urta oo liita 5 maalmood ka dib markaas laguuma arko in aad qaadsiin kartid dad kale. Haddii saami lagaa qaaday in kasta oo aadan lahayn calaamado cudur waxaa la tirinayaa 5 maalin laga billaabo maalinta saamiga lagaa qaaday.
- Waxaa inta kor ku xusan laga reebay: Haddii aad tahay **shaqaale ka shaqeeya caafimaadka iyo daryeelka oo aanaad qaadan ugu yaraan 3 tallaal**, waxaa lagu arkaa inaad faafin karto ugu yaraan 7 maalmood laga billaabo markii aad xanuunsantay. Haddii saami lagaa qaaday in kasta oo aadan lahayn calaamado cudur waxaa la tirinayaa 7 maalin laga billaabo maalinta saamiga lagaa qaaday.
- Haddii aad **deggantahay hoy gaar ah oo loogu tala galay dadka waayeelka ah ama isbitaal lagu daryeelay**, dhakhtarkaaga ayaa ka warbixin kara inta aad cudur dadka

qaadiin karto. Tani xitaa waa ay ku khuseysaa haddii aad leedahay hoos u dhac difaaca jirka ah oo xun.

Maxaan u baahanahay in aan sameeyo si aan dadka kale uga ilaaliyo inay cudur qaadaan?

- Waxaa laguugula talinayaa inaad guriga joogto oo aad iska ilaaliso inaad xiriir dhow dad kale la yeelato ilaa inta aad dadka cudur qaadiin karto.
- Haddii aad tahay shaqaale ka shaqeeya caafimaadka iyo daryeelka, waxaa laguugula talinayaa inaad wargeliso shaqo-bixiyahaaga.

Raadraaca faafitaanka cudurka — muxuu ka dhiganyahay?

Infekshin raadraacid ayaa lagu sameynayaa laamaha caafimaadka iyo daryeelka, ee ay joogaan dad halis ugu jira in ay covid-19 aad ugu xanuunsadaan. Waxaa sidaas darteed waajib kugu ah inaad gacan ka geysato raadraacidda faafitaanka cudurka si loo helo, loona wargeliyo dadka ay dhici karto in cudur lagu qaadiyo laamaha caafimaadka iyo daryeelka.

Sidee baan sameeyaa haddii aan u baahanahay daryeel caafimaad covid-19 ama cudur kale awgood?

- Wac taleefanka nambarka 1177 haddii aad u baahantahay talo caafimaad. Markaas waxaad heleysaa caawimaad ah in la qiimeeyo calaamadaha cudurka ama caawimaad ku aaddan meesha aad daryeel u raadsaneysid.
- Haddii aad u baahato inaad raadsato daryeel, waa muhiim inaad wacdo marka hore oo aanad si toos ah u tagin rugta qaabilaadda. Waxaa taas looga gol leeyahay inaad dad kale cudur ku qaadiin rugta qaabilaadda. Marka aad soo wactanto, waxaad heleysaa tilmaamo ku saabsan waxa ay tahay in aad sameeyso.
- Haddii aad u xanuusanaysid si nollosha khatar gelineysa wac 112.